



Dalkan iswiidhen dawladu waxay taageero ku bixisaa in dadka waawayn ay wax ubartaan qaab kooxwaxbarasho. Kooxwaxbarasho waxa weeyaan koox dad ah oo islakulma wakhtiyada ay firaaqada leeyihiin, kuwaas oo dhamaantood raba inay bartaan waxyaabo ku cusub. Hadaba tusaale ahaan waxyaabaha'ay baranayaan waxaa kamida ah tumida aaladaha kala gadisan, barashada luqad ku cusub iyo barashada habka loo kariyo cuntada. Horjoogaha kooxdu wuxuu noqonkara mid tabaruc ah ama mid shaqaale mishaar qata ah, khasabna maaha inuu yahay mid u tababaren macalinimo. Kaqaybqadashada kooxwaxbarasho waa mid ah qof wali iyo ikhtiyaarkii, qofna kuma heli doono shahaado maadooyinkii uu ka baratay.

Dalkan iswiidhen waxa jira 10 Ururwaxbarasho kuwaas oo bixiya kooxo waxbarasho oo kala gadisan. Ururadawaxbarasho waxaa kamida ururka waxbarasho ee "**Bilda**". Hadaba si loo ogaado dadka ka qayb qata kooxaha waxbarasho waxa uu horjooguhu ururiya qof wali oo ku jira kooxaha waxbarasho 10 kiisa namber ee aqoonsiga ah ee loo yaqaan 'personnummer ' ama namberka kaarka qaxootiga ee loo yaqaan 'LM kort' iyo da'da uu dhashay qofkaasi. Dalkan iswiidhen waxaa jira xeer horistaagaya in dawladu isku daydo inay ogaato cida ka tirsan kooxwaxbarasho. Ururka waxbarasho ee "**Bilda**" si aad ah ayey u ilaaliyaan raacida sharcigan iyo xeerarka dalka.